



# Sidee ayaan u caawiyaa qof waayay caymiskiisa caafimaadka ee Medicaid ?

## Xaqiji in macluumaadka ruuxu uu cusboon yahay.

Waxay ka eegi karaan onleyn ahaan si ay u xaqijiyaan in macluumaadkoodu uu saxan yahay ku jira xisaabtooda myCase ee [jobs.utah.gov/mycase](https://jobs.utah.gov/mycase) ama waxay la hadli karaan mid kamid ah kuwa soo socda si ay u cusboonaysiyan macluumaadkooda:

- Qorshahooda caafimaadka
- Waaxda Adeegyada Shaqaalah (DWS) lambarka 1-866-435-7414
- Wakiilka barnaamiska caafimaadka 1-866-608-9422

## U sheeg ruux inuu u fiirsado xisaabtiisa myCase, iimeelada, iyo boosta.

DWS waxay cusboonaysiin doontaa xisaabtooda myCase oo waxay u diri doontaa warqad ama iimeel kadib marka kiiska dib u eegida lagu sameeyo. Warqadan waxaa ku qoran **hal** kamid ah kuwa soo socda:

- Waxay weli u **qalmaan** caymiska caafimaadka ee Medicaid.
- **Uma qalmaan** Medicaid wixii intaa ka danbeeya. Warqadan waxa ku qornaan doona talaabooyin ay qaadi karaan si ay u helaan caymis caafimaad oo kale.
- **Macluumaad dheeraad ah ayaa loo baahan yahay** si loo eego hadii weli loo qalmo Medicaid. Warqadan waxaa la socda foomamka ay buuxinayaan oo waxay dalban karaan waraaqo xoojin ah (sida waraaqaha mushaharka, bayaanka bangiga, iwm.). Waa inay u diraan kuwan sida ugu dhakhsaha badan ee ay awoodaan— si ayna u dhaafin wakhtiga uu ku eeg yahay.

## Ka caawi ruuxa inuu iska duwaan geliyo caymis caafimaad oo kale.

Dadka waayay caymiska caafimaadka Medicaid maadaama oo ayna soo celin waraaqaha, waxay weli haystaan 90 maalmood inay dib u soo ceshadaan caymiskooda. U sheeg inay dib u soo diraan foomka ama waraaqaha kale ee dib u eegista ee DWS u baahan tahay markaba.

Dadka aan u qalmin caymiska caafimaadka Medicaid waxay weli heli karaan caymis ay ka helaan **Health Insurance Marketplace oo federal ah ama healthcare.gov**. Badanaa dadku waxay u qalmaan yaraynta kharashka caymiska caafimaad oo waxaa laga yareeyaa kharashka bishii iyo wada bixinta. Yarayntu waxay ku salaysan tahay cabirka iyo dakhliga qoyskooda. Dhamaan caymis yada Marketplace waxay bixiyaan waxyaabaha sida dawooyinka la qoro, booqashooyinka dhakhtarka, daryeelka degdega ah, booqashooyinka isbitaalka, iyo wax kale oo badan.

Dadka waaya Medicaid waxay haystaan 60 maalmood oo ay ku dalban karaan caymiska caafimaadka ee Marketplace. Caymiska caafimaadka caadiyan waxa uu leeyahay wakhti isdiiwaangelin oo furan sanad walba marka dadku isku duwaan gelin karaan caymiska caafimaadka. Waxa ay kaliya u ogolaadaan ruuxu inuu isduwaan geliyo wakhtiga isdiiwaangelin furan, iyada oo ay qabaan moojee "xaalad nolosha oo u qalanta". Waxaa la tixgeliya "xaalad nolosha oo u qalanta" hadii qof aanu u qalmin Medicaid wixii intaa ka danbeeya. Tani waxay ka dhigan tahay inay dadku haystaan **60 maalmood kadib marka ay ka dhamaato gunooyinka Medicaid** inay isku duwaan geliyaan caymiska caafimaadka ee cusub.

Booqo [healthcare.gov/medicaid-chip/transfer-to-marketplace/](https://healthcare.gov/medicaid-chip/transfer-to-marketplace/) wixii macluumaad dheeraad ah.